



Baaritaanka hantida iyo deynta laga dhintay iyo wargelinta dhaxalka (dödsboanmälan)

Maxay tahay? Goormese la sameeyaa?

Baaritaanka hantida iyo deynta laga dhintay

Marka qof geeriyyodo dadkiina dhaxalka ku leh waxaad sameynseysaan diiwaangelinta hantida iyo deynta uu ka tegay qof dhintay (en bouppckning). Taasna micnaheedu waxay tahay in aad xisaabisaan ee qoraal ka sameysaan qofka dhintay iyo xaaska/ninka hantidooda iyo deyntooda.

Waxa aad sameynseysaan waxaa lagu magacaabaa diiwangelinta hantida iyo deynta qofka dhintay (bouppckeckningen) mudo saddex bilood ah dugahooda marka qofku geeriyyodo kadib. Warqadaas waxaad u direysaan waaxda canshuuraha (Skatteverket) markaad diyaarisaa bil gudaheed.

Foomka lagu qoraayo iyo warqadaha waxbixintu ku yaalaanba waxaa laga dalban karaa waaxda canshuuraha (Skatteverket), ama telefoonkaan 0771 567 567, ama waxaa laga soo degsan karaa bogga internetka ah ee waaxda canshuuraha oo ah kan [Skatteverkets webbplats](#).

Wargelinta dhaxalka

Wargelinta dhaxalka waa qoraal dukumiinti ah oo marmarka qaar bedeli kara diiwaangelinta hantida iyo deynta marxuumka/marxuumada. Waaad codsi u dirsan kartaa si aad u sameyso wargelinta dhaxalka haddii qofka dhintay hantidiisu aysan dhaafsaneyn (ka badneyn) kharashka duugta/aaska iyo wixii kale ee kharasha oo ku baxaya calaashaa **geerida awgeed**.

Qofka geeriyyoday looma dhaafayo hanti kale sida hantida ma guurtada ah ama dhul cad oo aan dhisneyn oo Iswiidhan ku yaal ama wadanka dibadiisaba. Haddii qofka geeriyyoday uu leeyahay hanti nuucaas ah markaas waa in la sameeyo diiwaangelinta hantida iyo deynta laga dhintay (en bouppckeckning).

Si ay maamulka degmadu (kommunen) ay baaritaan ugu sameeyaan haddii ay suurtagal tahay in la sameyn karo iyo in aan la sameyn karin wargelinta dhaxalka (dödsboanmälan) waa in aad la xirriiro waaxda baaritaanka hantida iyo deynta laga dhintay (boutredningsenheten) saddex bilood gudahooda iyadoo laga soo xisabinayo maalintii geeridu dhacday.

La xirriirka ugu horeeya ku samee telefoon. Wac nambarkaan 031-367 90 79

Warbixin dheeraad ah iyo macluumaaadka xirriirka labadaba waxaad ka heleysaa waaxda baaritaanka hantida iyo deynta laga dhintay (Boutredningsenheten) ee Göteborg iyo boggaan internetka ah ee soo socda www.goteborg.se/boutredningsenheten

Diwaankaanka qoraalka ah ee hantida iyo deynta qofka dhintay ma la taaban karo ilaa dadka dhaxalka wax ku leh oo dhan ay ka wada arkayaan hantida meesha taal intey la egtahay.

Adiga waxa lagaa rabo inaad sameyso waa:

- 1. In aad ku wargelisaa dadka dhaxalka wax ku leh oo dhan geerida dhacday .**
- 2. In aad sugtaa oo aadan bixin biilasha, sababtoo ah kharashka duugta/aaska ayaa ka horeeya biilasha bixintooda oo dhan.**
- 3. Waa in aad joojisaa biilasha otamaatika u go'a ee lagu magacaabo (autogiro).**
- 4. Isku day in aad soo ogaato haddii uu qofka dhintay lahaa caymiska nolosha ama caymiska- kharashka duugta/aaska.**
- 5. In aad tagtid waaxda canshuuraha (Skatteverket) oo adareeska/ciwaanka ku bedeshid qofka maamulaaya hantida iyo deynta laga dhintay gurigiisa.**

6. In aad celisid heshiiska/kuntaraadka guriga, korontada, telefoonka iyo joornaalka iyo wixii kale oo la mid ah.

Dalbo kaalme dhaqaale oo lagu duugo/aasso

Si aad kaalme dhaqaale ugu dalbato duugta/aaska waxaad la xirriireysaa xafiiska arrimaha bulshada (socialkontoret) ee ku yaal xaafada uu qofka geeriyyoday deggannaa.

Qolada adeega bulshada ayaa kaaga sheekeyn doonta inta uu yahay kharashka loo qoondeyay iyo wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan nidaamka uu marayo duugta/aasku (utredningsprocessen).

Qasab kuguma aha in aad marka hore sameyso wargelinta dhaxalka (dödsboanmälan) si aad kaalme dhaqaaale ugu dalbato duugta/aaska. Waa isku mid oo adigoo sameeyay diiwangelinta hantida iyo deynta ayaad dalban kartaa (bouppeteckning) kaalme dhaqaaale.

Boutredningsenheten

Stora Badhusgatan 14
411 21 Göteborg

boutredningsenheten@socialresurs.goteborg.se
www.goteborg.se/boutredningsenheten

Telefon 031-367 90 79